**Degmada King • Xafiiska Kormeerka Fulinta Sharciga**
**(Office of Law Enforcement Oversight, OLEO)**

# QAABKA HAGISTA BULSHADA EE DIB-U-EEGISTA SIYAASADDA HA

King County
OLEO

Dukumeentigan wuxuu soo bandhigayaa guudmar ku saabsan habka hagista bulshada ee OLEO ee dib-u-eegista siyaasadda ha. Sharciga u yaal, Xafiiska Kormeerka Fulinta Sharciga OLEO wuxuu awood u siinayaa in ay dib-u-eegis ku sameeyaan oo talo u soo jeediyaan Sheriff-ka ku saabsan isbedelada ku saabsan siyaasadaha, xeerarka, nidaamyada, ama amarrada guud ee Xafiiska Sheriff-ka [K.C.C. 2.75.040(D)]. Iyada oo ay weheliyaan barnaamijyadeeda kale,

**Xafiiska Kormeerka Fulinta Sharciga OLEO waxay doonaysaa inay horumariso heerarka booliska iyada oo la adeegsanayo talooyinka siyaasadeed ee ku saleysan caddaynta iyo wada shaqeynta bulshada, taas oo ku dhisan sinnaanta.**

Si uu u hirgeliyo ujeedadaas, OLEO waxa uu soo saaray hab loo maro dib-u-eegista iyo horumarinta talooyinka siyaasadda iyadoo lala shaqeynayo bulshada iyo lala tashanayo. Qaab-dhismeedkani waa dukumenti nool, waxaanan ku martiqaadaynaa dadka ku nool Degmada King inay nala soo xiriiraan haddii aad xiisaynayso inaad ka qaybqaadato ama aad la wadaagto talooyinkaaga.

## KHARIIDADDA WADDADA

1. **Ogaanshaha Baahida Isbedel Siyaasadeed** →
2. **Dib-u-eegista Hore ee Siyaasadda** →
3. **Go'aaminta Heerka Hagidda Bulshada** →
4. **Qoraalka Qabyo Qoraalka Siyaasadda** →
5. **La Xiriir Saameynta & Qiimee Habraaca** →
6. **Wacyigelinta Bulshada**

**Macluumaad dheeraad ah**, booqowebsite-ka OLEO ama iimayl OLEO@kingcounty.gov.

## 1 Aqoonsi u yeelo Baahida Isbeddelka Siyaasadda

**Dib-u-eegista siyaasadda waxaa laga bilaabi karaa iyada oo loo marayo:**

- Xuquuqda Xafiiska Sheriff-ka ee Degmada King
- Tilmaamaha Guddiga La-talinta Bulshada ee Kormeerka Fulinta Sharciga (Community Advisory Committee for Law Enforcement Oversight, CACLEO)
- Xiisaha weyn ee bulshada
- Isbeddelka sharci ama go'aannada maxkamadda
- Natiijooyinka baaritaanada Xafiiska Kormeerka Fulinta Sharciga OLEO
- Cilmi-baarista Barnaamijka Siyaasadda ee Xafiiska Kormeerka Fulinta Sharciga OLEO
- Dadaallada Is-dhexgalka Bulshada ee Xafiiska Kormeerka Fulinta Sharciga OLEO

***Siyaasadda ma mudan tahay in dib loo eego?***

Haddii**midkoodna** si cad loogu jawaabo, sii wad. Haddii dhammaantood laga jawaabo "maya", siyaasadda dib looma eegi doono.

- *Siyaasadani ama isbeddelka siyaasadda ma saamaysaa bulshooyinka ama ku dhaawacmay boolisnimo si aan le'egayn?*
- *Siyaasadani ma xukuntaa is-dhexgal toos ah ama mid socota oo dhexmaraysa bulshada iyo shaqaalaha Xafiiska Sheriff-ka?*
- *Siyaasadani ma leedahay arrimo nolosha iyo badbaadada bulshada?*

## 2 Dib-u-eegista Siyaasadda ee Hore

**OLEO waxa uu sameeyaa dib-u-eegis hordhac ah oo ku saabsan siyaasadda kasta haddii ay khusaynayso.**

1. **DIB-U-EEGISTA SIYAASADDA**
   Dib u eeg ereyada, qeexitaannada, iyo doorashada ereyada si loo hubiyo in luuqaddu ay cad tahay iyo oo aan la khaldi karin.
2. **DIB-U-EEGISTA HAY'ADAHA WADAAGGA AH**
   Barbardhig hay'adaha kale ee fulinta sharciga.
3. **DIB-U-EEGISTA HAB-DHAQANNADA UGU FIICAN**
   Raadso cilmi-baaris iyo siyaasad tusaale ah oo ka timaadda ururada sida ACLU, IACP, iwm.
4. **DIB-U-EEGISTA WARBIXINADA HORE EE*KCAO* IYO *OLEO***
   Eeg talooyinkii hore si loo hubiyo in isbeddeladu waafaqsan yihiin.
5. **QIIMEE SI DHAB AH**
   Falanqee ku dhaqanka dhabta ah ee shaqada iyadoo la tixgelinayo xaaladda bulsho iyo ra'yiga dadweynaha.

## 3 Go'aami Heerka Hagida Bulshada

**MASHRUUCA SIYAASADDA EE HAGISTA BULSHADA:**
Habraac wada shaqayn oo ay ku jiraan bulshada iyo OLEO oo abuuraya alaabta siyaasadda.

*AMA*

**DIB-U-EEGISTA JAWAABTA DEGDEGGA AH:**
Habka la tashiga ah: OLEO waxay qortaa alaabta siyaasadda oo waxay u dirtaa bulshada si loo helo jawaabcelin.

***Ma jiraa baahi degdeg ah oo loo qabo isbeddelka siyaasadda?***

Haddii jawaabtu tahay haa, sii wad **Tallaabada 4** iyo oo samee Dib-u-eegista Jawaabta Degdegga ah. Haddii jawaabtu tahay maya, weydii su'aalaha soo socda. Haddii wax ka mid ah su'aalahan hagida lagu jawaabo "haa," waxay keeni doontaa Mashruuca Siyaasadda ee Hagista Bulshada ee Tallaabada 4.

- ***Ma jiraan aqoon iyo awood ku filan oo bulshada dhexdeeda ah oo talo wax ku ool ah bixin kara?***
- ***Talo-soo-jeedinta siyaasadeed ma tahay mid aad uga duwan dhaqanka hadda ee Xafiiska Sheriff-ka (tusaale, dib u qoris buuxda halkii laga samayn lahaa isbeddel yar)?***
- ***Ma jirtaa xiiso abaabulan oo bulshada ku dhex jira oo ku saabsan aagga siyaasaddan?***

*i* — *Marka aan hubin, la **tasho Ururada Bulshada ee Latashiga si** loo helo jawaab celin.*

## 4 Qabyo Qoraalka Alaabta Siyaasadda

**MASHRUUCA SIYAASADDA EE HAGISTA BULSHADA**

- Aqoonso dhinacyada muhiimka ah.
- Soo xaree ***Kooxda Shaqada ee Dhinacyada Muhiimka ah***. Mashaariicdan waxay ujeedadoodu tahay waqti dheer waxayna qaadan karaan 6-12 bilood iyadoo ku xiran baaxadda mashruuca.
- ***Kooxda Shaqada ee Dhinacyada Muhiimka ah*** waxay u arki kartaa inay lagama maarmaan tahay/ku habboon tahay inay si degdeg ah talooyin ugu diraan ***Xafiiska Sheriff-ka***.
- Bulshada iyo OLEO waxay si wadajir ah u diyaariyaan siyaasadda/talooyinka/warbixinta cilmi-baarista.
  - Ka hadal dhibaatooyinka, ka dood siyaasadaha kale ee la beddeli karo.
  - Go'aami qiimaha iyo yoolalka.
  - Heshiis gaadh - fahmo saamaynta suuragalka ah, ka dood marin u helka, sinnaanta, iyo doorashada luuqadda ku habboon.
- La tasho ***Kooxda Shaqada ee Dhinacyada Muhiimka ah*** loo ogaado baahida looguqabo dheellitirnaanta dheeraadka ah.
- Ku dhammee alaabta siyaasadda (memo, warbixinta cilmi-baarista, luqadda siyaasadda, iwm.).
- U dir ***Xafiiska Sheriff-ka***.

***Doorka Xafiiska Kormeerka Fulinta Sharciga OLEO: Wada Shaqeynta***

*AMA*

**DIB-U-EEGISTA JAWAABTA DEGDEGGA AH**

- Xafiiska Kormeerka Fulinta Sharciga OLEO waxay qoreysaa soo koobista talooyinka iyada oo ku saleysan **Tallaabad a 2: Dib-u-eegista Siyaasadda ee Hore**.
- U qaybso ***Ururada Bulshada ee Latashiga*** ee leh waqti laba toddobaad ah.
- Ku dar jawaab/talo celinta ururada latalinta.
- U dir talo-soo-jeedinta ugu dambaysa ***Xafiiska Sheriff-ka***.

***Doorka Xafiiska Kormeerka Fulinta Sharciga OLEO: La Tashan***

## 5 Xidhiidhka Saameynta iyo Qiimeynta Habka



- Ku dheji talo-soo-jeedinta siyaasadda b ogga internet-ka ee OLEO oo ogeysii ***Ururada Bulshada ee Latashiga*** ama ***Kooxda Shaqada ee Dhinacyada Muhiimka ah*** haddii loo baahdo.
- La soco hirgelinta siyaasadda ee ***Xafiiska Sheriff-ka*** oo u dir jawaabta bulshada.
- Ku xiriiri cusbooneysiinta warsidaha, raadraaca siyaasadda, warbixinta sanadlaha, iwm.
- Soo ururi talooyinka ku saabsan geeddi-socodka

! *Sanad walba qiimee si loo hagaajiyo habka dib-u-eegista siyaasadda oo loo xaqiijiyo aragtida bulshada.*

## 6 Wacyigelinta Bulshada



- Qor hageyaal siyaasadeed ama muuqaallo waxbarasho oo sharaxaya muhiimadda arrimaha siyaasadda.
- Ka qeyb gal dhacdooyinka bulshada oo qabso aqoon isweydaarsiyo si loo sharaxo waxa barnaamijka siyaasadda ee Xafiiska Kormeerka Fulinta Sharciga OLEO qabto.
- Naqdee oo sii tababaro awood dhisid kuwa ay siyaasadda ugu saameynta badan tahay.
- Samee maktabad kheyraad leh oo leh barnaamijyo iyo qalabyo dibadda ah oo la xiriira.
- La shaqee ururada bulshada si loo hormariyo kheyraadka loogu talagalay baahiyaha waxbarashada iyo kuwa shaqsiga ah.

***Doorka Xafiiska Kormeerka Fulinta Sharciga OLEO: Wacyigelin***